

Taariikh dib u-dhigid ma lagu samayn karayaa Dheeftayda Guriyeynta iyo Dheefta Cashuur Cashuurta Kawnsalka?

(Can you backdate my Housing Benefit and Council Tax Benefit?)

Wareqaddan-yare daabacani waxay sharax ka bixinaysaa dheefta taariikh-dib u-dhigidda (backdated benefit). Qawaaniintu waa heer qaran, waana isku-mid meel kasta ood ku nooshahay. Haddii aanad garanayn ka uu yahay kawnsalka shaqada ku leh deegaanka aad ku nooshahay, waxad ka heli karaysaa biilka aad ku bixiso Cashuurta Kawnsalka.

Dib loogu nogday 6 oktoobar 2008

Waxan ahay 60 jir ama kaba weyni. Goorma ayey dheeftaydu bilaabmaysaa?

Haddii aad adigu, ama cidda aydu is-qabtaan, ka weyntihiin 60 jir oo aydu u-qalantaan Dheef Guriyeyn iyo/ama Dheef Cashuur Kawnsal, waxa laydiin bilaabi karayaa 3 bilood ka hor taariikhda aydu codsiga dhabta ah samayseen, taas ooy shardi u tahay in aydu xaq u-lahaydeen muddaasi. Haddii aad tahay 60 jir ama aad ka weyn-tahay waxad xaq u-leedahay in aad ka faa'idaysato taariikh ka horaysay codsi-gaaga, waxana lagu siinayaa si ootomaatik ah. Anagu uma baahnin in aanu ogaano waxa aad dakhso ugu dalban-weyday si lagu siiyo dheef taariikh-dib-u-dhigid.

Si aanu u-qiimayno inta ay tahay dheefta aad xaq u-yeelan doonto, waxa loo baahan-yahay in aad keento caddayn dakhli-gaaga/ras'maal iyo kiro mas'uuliyadi kaa saaran-tahay muddada aad doonayso in aad codsato. Fadlan la xidhiidh kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga haddii aad rumaysan-tahay in ay ahayd in codsi-gaaga laga bilaabo taariikh kasii horaysay.

Warqaddan-yare daabacan inteeda kale waxay sharax ka bixinaysaa taariikh-dib-u-dhigidda ku saabsan dadka da'doodu ka yar-tahay 60 jir.

Anigu da'daydu way ka yar-tahay 60 jir. Goorma yaa dheefta lay bilaabayaa?

Haddii aad u qalantid Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur Kawnsal (ama labadaba), waxanu sida caadiga ah bixinaa dheefta laga bilaabo Isniinta ka dambaysa marka ugu horaysa eed samayso foomka codsiga aad noo soo dirayso (kol haddii foomka codsiga lagu soo celiyo bil ka bilaabmaysa taariikh-dib-u-dhigid).

Marka aad ku samayso codsi Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur Kawnsal (ama Labadaba) tilifoon aad ka soo dirtay (Jobcentre Plus), taariikh aanu ula macaamilno in codsi-gaaga la sameeyey waxay noqon doontaa taariikhda ugu horaysay eed xidhiidh la yeelatay (Jobcentre Plus).

Haddii aad qaadato Taakulayn Dakhli (Income Support) ama Gunno Shaqo-raadis (Jobseeker's Allowance) (Ku salaysan dakhli), Dheef Bukaani ama Gunno Shaqo-raadis (ku salaysan tabaruc), dhammaan dheefo waxay yeelan doonaan codsi taariikh isku-mid ah.

Mararka qaarkood waxanu bixinaa dheefta ka hor taariikhda aad codsatay. Taasi ayaa loo yidhaa taariikh-dib-u-dhigid. Wuxu dhigayaa in aanu taariikh-dib-u-dhigid ah ilaa 6 bilood ku samayn karayno bilowga codsiga. Hase yeeshe, waa in aad sabab lagu qanci karayo u hayso waxa uu codsi-gaagu dib ugu dhacay. Taasi ayaa loo yaqaanaa "sabab wanaagsan".

Maxaa loo aqoonsan-yahay in uu yahay "sabab wanaagsan"?

Waxanu u eegi doonaa xaalad kasta si ku salaysan qof-qof. "Sabab wanaagsani" waxa weeye sabab kaa horjoogsatay in goor hore samayso codsigaaga dheefta. Sababaha wanaagsan waxa ka mid ah kuwan soo socda, oo ku xidhan dhuruufaha:

- In aad bugtay oo aanay jirin cid kuu samaysa codsiga.
- In aad sugayso go'aan ku saabsan dheef kale.

- In uu urur rasmiyi qalad kuugu sheegay in aanad xaq u-lahayn Dheef Guriyeyn ama Dheef Cashuur Kawnsal (ama labadaba).
- In aanad fahansanayn in aad codsan karayso, sababta oo laga yaabo in ay tahay:
 - da'daada;
 - in aad u khibrad-darayd nidaamka dheefta;
 - dhibaatooyin kaa haysta luuqadda;
 - dhibaatooyin kaa haysta fahanka waraaqaha farsamo la xidhiidha; ama
 - sababo qaar kale ah.
- Haddii aanad codsan isla-markiiba ka dib markii aad ka baxday isbitaalka, xabsiga ama daryeelid muddo dheer.
- Haddii aanad maulan karayn arima-haaga oo aanad haysan cid ku caawisa.
- Haddii uu dhintay qof aydu ehel tihiin.

Tusaalooyinkani waxa weeyi oo keliya tilmaamid ku caawinaysa. Maaha liisto buuxda oo ah dhammaan sababaha suura-galka ah. Haddii aad iloowdu in aad codsato, ama aanad garanayn in aad codsan karayso, taasi keligeed ma noqon karayso sabab wanaagsan. Waxa keliya oonu taariikh-dib-u-dhigid ku samayn karaynaa dheeftaada haddii ay sababah aad hore ugu dalbanweyday soo jireen ooy dhammaadeen waqtigii aad codsiga samaysay.

Waa kuwan tusaalooyinka qaarkood:

Waxad bugtay laga bilaabo Janaayo ilaa Maarso waxanad dheefta codsatay oo keliya bisha Maarso markii aad ladnaatay. Goor hore maad codsan waayo maad haysan cid ku caawisa. Xaaladda sidaas ah, waxa lagaa yaabaa in aanu eegno taariikh-dib-u-dhigidda dheeftaada ilaa Janaayo.

Hase yeeshe, haddii aad bugtay laga bilaabo Janaayo ilaa Maarso oo aanad haysan cid kuu samaysa codsiga, hase yeeshe aanad codsan ilaa Maayo, kuma samaynayno dheeftaada taariikh-dib-u-dhigid ah ilaa Janaayo waayo sababta fiicani sii may socon laga Janaayo ilaa Maayo.

Sidee ayaan u codsadaa taariikh-dib-u-dhigid dheefeed?

Haddii aad sabab lagu qanco u hayso dib u-dhaca samaynta codsiga, waxa weeye in aad isla-mar-kiiba qoraal noogu soo sheegto. Waxa weeye in aad noo sheegto muddada aad doonayso in taariikh-dib-u-dhigid lagu sameeyo iyo waxa uu codsi-gaagu dib ugu dhacay. Waxanu u baahan-nahay in aanu aragno caddayn taageeraysa sababaha aad sheeganayso (tusaale ahaan, shahaadado caafimaad ama warqado isbitaal).

Haddii aad doonayso in lagu caawiyo, fadlan waydiiso kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga. Waxa kale ood caawimo ka heli karaysaa waakiil talo-bixiye, sida xafiiska talo-siinta muwaadiniinta (citizens advice bureau). Kuwaas ood tilifoonkooda iyo waakiillo talo-siin kaleba ka helayso Buuga Tilifoonka iyo maktabada ku taal deegaan-kaaga, ama haddii aad la xidhiidho kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga.

Maxaa markaasi dhacaya?

Waxanu eegi doonaa bal haddii dheeftaada taariikh-dib-u-dhigid ku salaysan macluumaadka aad siisay lagu samayn karayo. Waxanu kuu soo diro doonaa warqad aanu

kuugu sheegayno go'aanka aanu gaadhay. Haddii aanu go'aansano in aannaan taariikh-dib-u-dhigid ku samayn dheeftaada waanu kuu sheegi doonaa waxa ay tahay sababtu.

Ka warama haddii aanan go'aankiina ku qanacsanayn?

Laga yaabaa in aanu go'aansano in aanay sababaha aad sheeganaysaa ahayn qaar si fiican loogu qanci karayo si taariikh-dib-u-dhigid loogu sameeyo dheefta aad codsatay. Haddii aanad taasi ku qancin , waa in aad noo soo qorto warqad aad ku codsanayso in go'aanka dib loo hubiyo markale. Waa aad in muddo bil gudeheed ah oo ka bilaamaysa taariikhda warqadda go'aanka nagula soo xidhiidho. Waxa kale ood noo soo diri karaysaa tilifoon, warqad ama noo kaalay si aad noo waydiisato in aanu sharax kaa siino go'aan-kayaga. Waxa kale ood codsan karaysaa bayaan sababaha oo qoraal ah, kaas oo macluumaad dheeraad ah ka bixinaya go'aan-kayaga.

Haddii aanad weli ku qanacsanayn, waxad rafacaan qoraal ah u qaadan karaysaa Kawnsalka ku yaal degaan-kaaga Qaybta Dheefaha. Adeega Rafcaanada ayaa markaasi go'aan kaga gaadhi doona rafcaan-kaaga dhegaysi maxkamadeed (ka eeg wixii macluumaad dheeraad warqadda-yare daabacan ee la yidhaa "Waxa aad samaynayso haddaad u-malaynayso in go'aanka laga gaadhay Dheeftaada Guriyeynta ama Dheeftaada Cashuurta Kawnsal uu qalad yahay").

Halkee ayaan ka heli karayaa talo-siin kale?

Haddii aad u baahan-tahay caawimaad ama talo-siin dheeraad ah, la xidhiidh kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga. (Waxad ka heli karaysaa magaca kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga warqadda biil-kaaga Cashuurta Kawnsalka.)

Talo-siin madax-bannaan

Hadii aad u baahan-tahay talo-siin madax-bannaan, waxad la xidhiidhaa xafiiska talo-siinta muwadiniinta ee ku yaal deegaan-kaaga. Kuwaas ood tilifoonkooda iyo waakiillo talo-siin kaleba ka helayso Buuga Tilifoonka iyo maktabada ku taal deegaan-kaaga, ama haddii aad la xidhiidho kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga.

Qaabab kale

Waxad ku heli karaysaa macluumaadka ku yaal buugan-yar far-waayeyn, far Indhoole, werin dhegaysi iyo luuqado kale. Booqo websaytka (www.benefit-leaflets.org) wixii maclumaad dheeraad ah.